



XAFIISKA QARAMADDA MIDDQBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIA (UNSOM)

WAR SAXAAFADEED 14/2014

Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsna Soomaaliya oo cambaareeyey dilka loo geestay xildhibaan Soomaaliyeed

Muqdisho, 21 April 2014 – Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya (SRSG), Nikolaas Kay ayaa cambaareeyey dilka loo geestay Isaaq Maxamed Riino oo ahaa xubin ka tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed. Dilka mudanaha kadib ayeyey Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ku baaqday in si buuxda loo baaro arrinta, dambiilayaashane la hor keeno cadaaladda.

Marxuum Riino saakay ayaa lugu dilay Muqdisho kadib markii ay qarxeen waxyaalaha qarxo oo gaarigiis lugu xiray. Xubin kale oo Baarlamaanka ka tirsan oo la yiraahdo Maxamed Cali iyo dad kale oo rayyid ah ayaa ku dhaawacmay isla weerarkaas.

“Waxaan si xoog leh u cambaareynayaa dilkaan. Waa in si buuxda loo baaraa falkaan argagixisnimada leh, dambiilayaashane si dhakhso ah loo hor keeno cadaaladda” ayuu yiri Ergayga Gaarka ah.

SRSG Kay ayaa u diray tacsii tiiraanyo leh qooyksii iyo saaxiibadii uu ka geeryooday Riino iyo sidoo kale Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeedba wuxuuna u rajeeyey mudanihii la dhaawacay Maxamed Cali iyo dadkii kale ee rayyidka ahaa in si dhakhso ah u biskoodaan.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Fadlan eeg rugta Internet-ka:
www.unsom.unmissions.org



@UNSomalia



facebook.com/UNSomalia